

Dexter oo loogu talo galay dugsiyada hoose

Kootada waalidka iyo masuulada

Juun 2016

Maxaad arki kartaa oo samaysaa Dexter?

Waalid ahaan ama masuul, waxaad soo geli kartaa Dexter, adeeg koronto ah oo kuu oggolaada in aad bixiso ama hesho macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan waxbrashadda ilmaha. Waxaad uga warbixin kartaa maqnaanshaha ilmahaaga ama xanuunka si toos kombuyuutarkaaga. Sidoo kale waxaad arki kartaa diiwaanka soo xadirka ilmahaaga, ka arki kartaa darajooyinkooda, ka akhriyi kartaa warqaddaha todobaadlaha ah, iyo waxii la mid ah.

Haddii aad u baahantahay ka warbixinta maqnaanshaha ilmahaaga, waalid ahaan ama masuul ahaan waxaad tan uga samayn kartaa si toos Dexter ama abka telefoonka smartka ah ee Dexter.

Sideed u soo gashaa Dexter?

Si aad u soo gasho Dexter, waxaad u baahantahay kooto ka kooban magaca isticmaalaha iyo kelmadda sirta ah. Waxaad ke heli doontaa magaca isticmaalaha iyo kelmada sirta ah dugsiyada marka ilmahaagu ugu horayn bilaabo dugsiyada.

Waxaad ka soo geli kartaa Dexter <https://ostersund.dexter-ist.com>.

Badbaado ku hayso macluumaadkaaga kootada.

Haddii aad waydo macluumaadkaaga soo gelitaanka, la xidhiidh maamulaha dugsiyada ilmahaaga. Waxay u soo diri doonaan faahfaahinta cinwaankaaga diiwaangashan.

Xeerka Ilaalinta Xogta (Personuppgiftslagen, PUL)

Macluumaadka ku saabsan waalidka iyo masuulada waxaa laga soo qaatay diiwanada degmadda Östersundee soo martay masuuliyiinta cashuurta Sweden, Skatteverket. Haddii waalidka ama masuulku ku noolyahay degmo kale, waxaan marmarka qaar u baahanaa in aanu ka soo saarno macluumaadka kaydka xogta wayn ee daboolaya dhammaan Sweden. Diiwaanada ardayda kaas oo aqoonsigooda la ilaaliyo waxaa loo sameeyaa gacan ahaan oo laguma arki karo Dexter.

Guddoomiyaha xogta gaarka ah ee degmadda Östersund / Daryeelka Ilmaha & Waaxda Waxbarashadda waa Håkan Edlund, khabiirka IT, Daryeelka Ilmaha & Waaxda Waxbarashadda.

Telefoonka: +46 (0)63 14 30 00

limayl: hakan.edlund@ostersund.se

Oggolaanshaha khaladaadka suuragalka ah

Wakhti ka mid ah sanadka, sida muddada xagaaga marka isbeddelka sanadka tacliimeed, uu sameeyo fasalo cusub, kooxaha iyo jadwalada, macluumaadka qaarkood mar marka qaar waxay noqon karaan kuwo khaldan. Sidoo kale waanu bakhtiinaa nidaamka muddooyin gaaban. Waxaanu ku siin doonaa macluumaad ku saabsan tan wakhti hore.

Waxaad ka soo dejin kartaa macluumaadka iyo buugyaraha isticmaalaha ee Dexter oo dhowr luqadood ah boggan:

<http://www.ostersund.se/barn-och-utbildning/grundskola/dexter.html>